


Adeega dadweynaha ee Fiktooriya



Ma u baahan tahay turjumaan?

Haddii caawimaad u baahan tahay si aad ula hadasho shaqaalaheena, taleefangaree 1300 360 054 una sheeg soodhaweynta. Turjumaan waa laguu qaban karaa.


Yaa heli kara daryeelka ilkaha Dadweynaha?

Qof kasta oo u baahan **Gargaarka degdega** ah ee ilkaha waa lagu daaweyn karaa isbitaalka Ilkaha ee Melbourne, ee ku yaal 720 Swanston Street, Carlton. Waxaa laga yaabaa inaad yareyso wakhtiga sugitaankaaga haddii aad marka hore soo wacdo 1300 360 054.

Si aad u hesho daryeelka **takhasuska**, **ilkaha** ama mid **guud** adoo maraya nidaamka ilkaha dadweynaha, waxaad u baahan tahay inaad xaq u leedahay. Dadka xaq u leh waxay sidoo kale isticmaali karaan daryeelka gargaarka degdega ah ee rugaha ilkaha ee bulshada.

Dadkan soo socda xaq bay u leeyihiin:

- Dhammaan carruurta jirta 12 iyo ka hoose
- Dadka heysta mid ka mid kaadhahkaan lacag dhimsita ee hoose iyo qofkasta oo kale oo ku qoran kaadhka



Health Care Card
(Kaadhka Daryeelka
caafimaadka ee Dawlada)



Pensioner Concession Card
(Kaadhka lacag dhimista
ee Hawlgabka)

- Dadka Aboriginiiska ah iyo Torres Strait Islanders ee jooga Isbitaalka Ilkaha ee Melbourne
- Qaxootiga dhawaan yimid iyo Magangelyo doonka
- Carruurta ka diiwaangashan dugsiyada koritaanka khaaska ah
- Kuwa degan degaanka la daryeelo ee ay bixiso Qaybta Qoysaska, Dhalinyarada iyo Carruurta ee Wasaaradda Adeegyada Bani'aadamka.

Ma leedahay carruur jirta inta u dhaxeysa 12 ilaa 17 sanno?

Carruurta da'doodu u dhaxeeyso 12 ilaa 17 sanno waxaa laga yaabaa inay helaan jeegareynta ilkaha oo bilaash ah iyagoo isticmaalaya Qorshaha Dhalinyarada ee Medicare, wixii faahfaahin ah, taleefan u dir 132 011 (lacag ayaa lagugu dalacayaa) ama gal www.medicareaustralia.gov.au.

Sidee baan u sameeyaa ballan?

La xiriir rugta caafimaadka ilkaha bulshada ee xaafadaada. Taleefan 1300 360 054 ama gal www.dhsv.org.au si aad hesho rugta caafimaadka ee kuugu dhwo. Markaad wacdo, soo dhaweynta ayaa jeegareynsa inaad xaq u leedahay. Haddii aad xaq u leedahay, waxaa lagugu darayaa liiska sugitaanka.

Waa intee kharashkeedu?

Intaad bixineysaa waxay ku xiran tahay xaaladaada iyo nooca daaweynta ee aad u baahan tahay. Waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad ku hesho daaweynta bilaash ama waxaa laga yaabaa inay jirto kharash la xiriira.

Wixii macluumaad dheeraad ah, gal www.dhsv.org.au ama taleefan 1300 360 054.

Gargaarka Degdega ah

Ma leedahay:

- dhaawac ilkaha ah
- dhiig aad u daran oo ilkaha ah ama
- barar afkaaga hareerahiisa ah?

Waxaad sameynayso

Inta lagu jiro wakhtiyada hoos ku qoran, ka taleefangaree isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne 1300 360 054.

Isniinta ilaa Jimcaha

8: 30 subaxnimo ilaa

9: 15 galabnimo

Sabtida iyo Axada iyo Fasaxyada dadweynaha

9: 00subaxnimo ilaa

9: 15 galabnimo

Wixii ka baxsan wakhtiyada kor ku qoran, la xiriir isbitaalka kuugu dhwo.

Kooxahan midkoodna ma gelayaa?

- Caruur iyo dhalinyaro ka yar 18 sanno
- Aborjuniis iyo Torres Strait Islanders
- Qaxooti dhawaan yimid iyo Nabadgelyo doon
- Qof dumar ah oo uur leh oo u baahan daryeel guud.

Haddii aad tahay mid ka mid ah kooxaha kore, waxaa laga yaabaa inaad gelin liiska sugitaanka. U sheeg soo dhaweynta inaad xaq u yeelan karto in '**imudnaanta sticmaalka**'.

Faallooyinka iyo Cabashooyinka



Si aad u bixiso natiijo celin ama aad cabasho uga sameyso Isbitaalka Ilkaha Royal ee Melbourne, fadlan la xiriir:

Dental Health Services Victoria

720 Swanston Street

Carlton VIC 3053

Taleefan (03) 9341 1000

Wicitaan bilaash ah (Goobaha baadiyaha):

1800 833 039

website: www.dhsv.org.au

Si aad u bixiso natiyo celin ama aad u cabasho uga sameyso rugta caafimaadka ilkaha, fadlan ula xiriir rugta caafimaadka si toos ah.